ka fogaada toddobada lagu halaagsamo

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "ka fogaada toddobada lagu halaagsamo ", waxay yiraahdeen: Rasuulkii Ilaahayow maxay yihiin? wuxuu yiri: "waa Ilaahay oo loo shariig yeelo, Sixirka, dilka Nafta Ilaahay xarimay in xaq lagu dilo mooyee, cunida Ribada, cunida Maalka Agoonta, cararida Maalinta Jihaadka iyo in la qadfo Gabdhaha Muxsinaatka ah ee Muuminiinta ah ee aan warba hayn".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulka Ilaahay wuxuu Ummaddiisa faray inay ka fogaadaan todoba dambi oo ah macaasi lagu halaagsamo, markii la waydiiyey ee la yiri waa kuwee? wuxuu ku sheegay inay yihiin: Tan koobaad: waa Ilaahay oo loo shariig yeelo, iyadoo la samaysto wax Ilaahay loo ekaysiiyo oo lalasimo nooc walba oo uu yahay, isagaa nusqaan oo dhan ka hufane, iyo cibaado cibaadooyinka ka mida oo Ilaahay qayrkii loo leexiyo, shirkiga ayuu ku bilaabay, waayo isagaa danbiyada u wayn. Tan labaad: waa Sixirka- waana guntimo wax lagu tufay iyo dawooyin iyo Qiiq-, kaasoo jirka ku saamaynaaya dhimasho ama bugto ama kala gayn labada is qabta, waana shaqo shaydaan, in badan oo Sixirka ka mida lama samayn karo ilaa Ilaahay loo shariig yeelo iyo in loogu dhawaado arwaaxda xun in loo sameeyo waxay jeceshahay maahee. Tan seddexaad: waa dilka Nafta Ilaahay reebay dilkeeda in lagu dilo wax sharci ah ee Xaakimku fuliyo maahee. Tan afraad: waa Ribada in loo isticmaalo cunid ama qaab kale oo nafac leh. Tan shanaad: waa ku xad gudubka maalka Agoonta uu Aabohood dhintay iyagoon qaan gaarin. Tan lixaad: waa in laga cararo dagaalka gaalada la gula jiro. Tan todobaad: waa in lagu tuhmo Sino Gabdhaha Xorta ah ee dhawrsan, waxaa la mida in Raga lagu tuhmo.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3331